


# Soomaali/Somali

Si aan u helno adeegyada ay bulshadayadu u baahan tahay si ay u hesho mustaqbal fiican, marka hore waa inaan fahannaa cida aanu nahay qaran ahaan. Taasina waa sababta uu u jiro tiro tirokoobku.

Tirikoobka waa shuruud distoori ah oo ah tirinta dhamaan dadka ku nool Mareykanka (U.S.) - muwaadiniinta iyo kuwa aan muwaadiniinta ahaynba. Xogta lagu soo uruuriyo tirakoobka wuxuu ka caawinayaa dawladda federaalka sidii ay ugu kharash garayn lahayd lacag ka badan \$400 oo bilyan oo doolar oo ah maal gelinta federaalka sanad walba:

- *Cisbitaalada*
- *Xarumaha tababarka shaqooyinka*
- *Dugsiyada*
- *Xarumaha dadka da'da ah*
- *Kaabadaha, bulalka iyo mashaariicda hawlaha gund.*
- *Adeegyadda deg-degga ah*



Tirakoobku wuxuu sidoo kale gacan ka geysanayaa go'aan ka gaadhista tirada kuraasta gobolkaagu ku yeelanayo Aqalka Wakiilada ee Mareykanka

## **Hore Uma Socon Karno Ilaa Aad Dib U Soo Dirto Mooyaane.**

Bisha Maarso, 2010 gudaheeda, foom kooban oo ay ku qoran yihiin 10 su'aalood ayaa loo gudbin doonaa guri kasta oo ku yaala US, iyo Puerto Rico. Marka aad hesho foomkaaga, ka jawaab uun 10-ka su'aalood ee kooban kadibna dib ugu soo dir galka lacagtiisa la sii qadimay ee lagu soo raaciyay.

Foomka tirokoobka BUUXINTIISU AAD BAY U FUDUD DAHAY, inta badanna aad ayay MUHIIM kuugu tahay adiga iyo mustaqbalka bulshadaada waana mid BADBAADSAN.

Cidda aad tahay iyo macluumaadka aad bixisaa wuu dhawrsoon yahay waxaana loo haynayaa si khaas ah oo waafaqsan sharciga federaalka. Taa waxaa soo raaca, laguma waydiin doono sharciyada aad wadankaan ku joogto.

Haddii aanad foomka dib u soo dirin, waxaa laga yaabaa inuu ku soo booqdo tiro-koobe. Tiro-koobuhu waa shaqaale ka tirsan Xafiiska Tirokoobka Mareykanka, inta badanna waa qof ka socda bulshadaada, kaas oo soo booqanaya gurigaaga isagoo ururinaya macluumaadka loogu baahan yahay foomka tirakoobka.

## **Tiro-Koobe Kastaa Wuxuu Ku Dhaartay Inuu Xafido Macluumaad Kasta Oo Aad Bixiso. Waana Sharci Dhigan.**

Haddii aannan ku helin wareysi su'aaleedka oo dhammeystiran e-mail ahaan, shaqaale tiro-koobe ah ayaa kuugu imaan doona gurigaaga si uu u helo macluumaadka.haan.

## **Hadda sii sahmi foomka Tirokoobka 2010**

Hore ula sii qabso foomka tirakoobka adigoo adeegsanaya Tilmaamaha Taakulaynta Luqadda. Tilmaamaha Taakulaynta Luuqadda waxaa lagu heli karaa 59 luuqadood waxaanu kaa caawin doonaa inaad foomka ku buuxisid Ingiriisi.